

BUUGA II

Dalalka yurub oo wada shaqeynaya

# MAGANGALYADA, HELIDDA QOYSKA & DIB-UDEJINTA





# SOO DHAWWOOW!



## Sheekadan waxay ku saabsan tahay afar dhallinyaro — sida adiga oo kale

Waxay si nabad ah ku yimaadeen Yurub ka dib safar dheer.

Qaar ka mid ah dhallinyarada ayaa kelidood yimid. Qaar kalena waxay la yimaadeen qoys.

Waxay qabaan su'aalo badan — waxaana ka caawinaya dadka ka shaqeeya meesha ay ku nool yihiin.



## Sheekadan sidoo kale adiga ayey ku caawin kartaa!

### Waxaad baran doontaa:

- waxa ay ka dhigan tahay **magangelyo, helitaanka qoyska & guurinta**
- waxa aad filan karto
- sababta ay muhiimka kuugu tahay inaad ka qayb qaadato oo la shaqeeyso saraakiisha
- yaa ku caawin kara?
- wax ku saabsan xuquuqdaada

### Waxaad akhrin kartaa sheekadan:

- keligaa
- saxiib kula socdo
- ama qof halkan ka shaqeeya






## Qaado wakhtigaaga. Waa SAX inaad joojiso oo dib uga soo noqoto mar kale.

Haddii wax ay adag yihiin in la fahmo, weydii qof kuu sharxa.

Masuulkaaga, shaqaalaha bulshada ama qareenka ayaa kaa caawin kara.

### DHAMAADKA, WAXAAD KA HELI DOONTAA:

-  bog leh macluumaad deegaanka
-  su'aalo xiiso leh
-  meel aad ku qori karto su'aalahaaga iyo inaad ku darto xiriirro waxtarka leh

**Carruurta ka yar 18 sano oo keligood yimaada**, waxaa loo magacaabi doonaa masuul. Qaar ka mid ah waddamada, masuulka waxaa sidoo kale loogu yeeraa wakiiil.

Sidoo kale, qaar ka mid ah waddamada, **codsashada magangelyada** waxaa loo yaqaannaa **codsashada ilaalinta caalamiga ah**.



Ugu dambeyntii, ogow in dhammaan adeegyada lagu bixiyo xarumaha soo dhawaynta ee aad joogto ay yihiin bilaash. Haddii xubin ka tirsan shaqaalaha uu kaa codsado lacag, la hadal sarkaal aad ku kalsoon tahay ama ilaaliyahaaga.

# LA KULAN SHAQSIYAADKA SHEKADAAN KU JIRA

## Mohamed

Waxaan ahay 17 sano jir. Waan faraxsanahy inta badan. Waxaan jeclahay inaan caawiyo qoyskeyga iyo asxaabteyda marka aan awoodo. Waxaan keligay yimid dhowr toddobaad ka hor waxaana raadinayaa awoowgay. Waxaan xiiseynayaa inaan bilaabo shaqo.



## Ahmed

Waxaan ahay 15 sano jir Waxaa ila socday walaashay weyn Jasmine, oo ila jirtay tan iyo markii hooyaday geeriyootay. Waxaan jeclahay inaan waqti la qaato dadka iyo inaan saaxiibo cusub sameeysto. Runtii waxaan jeclaan lahaa inaan ku noqdo iskuulka sida ugu dhaqsaha badan. Waqti xaadirkan, waxaan baranayaa luqadda deegaanka halkan.



## Jasmine

Waxaan ahay 24 sano jir Waxaa ila socday walaalkay, Ahmed, oo aan ugu dadaalo sidii ugu wanaagsan ee aan u daryeeli karo. Waxaan nimid dhowaan waxaana isku dayeynaa inaan ku biirno adeerkay oo muddo ku noolaa Yurub. Waxaan jeclahay ciyaaraha waxaana aad ugu fiicanahay kubadda cagta.



## Adam

Waxaan jahay 9 sano jir. Waxaan halkan joogaa keligay. Hada, waxaan goaansadey inaan hadlin. Waxaan la soo kulmay waxyabo xun oo badan intaan halkaan imaan kahor. Waxaan u baahanahay waqti ka hor inta aan mar kale hadlin. Laakiin waan caqli badanahay oo waan fahmaa wax walba. Waxaan ahay dhageyste wangsang waxaana rabaa inaan dugsi tago. Waxaan jeclahay dhammaan saaxiibada cusub ee aan illaa hadda samaystay.



## Ms Ines

Waxaan ahay masuul ka shaqeeya xaruntan soo dhawaynta. Waxaan isku dayaa inaan taageero dhammaan carruurta iyo dhallinyarada codsanaya magangelyada sida ugu wanaagsan ee aan awoodo. Waxaan jeclahay cunto karinta, wayna i farxad gelisaa marka qof walba mashquul yahay oo firfircoon yahay. Jimicsigu wuxuu dhammaanteen naga dhigaa kuwo qaba caafimaad jidheed iyo maskaxeedba.



## Mr Fred


Waxaan ahay la-taliye sharci, taasoo ah nooc qareen ah. Waxaan halkan kala shaqeeyaa asxaab badan oo si fiican loo tababaray. Waxaan siiyaa macluumaad iyo taageero dhammaan codsabayaasha magangelyada arrimaha sharciga iyo codsiyada magangelyada. Waxaan jeclahay xirashada funaanado midabo leh oo fariin ku qoranatahy.



Mahad weyn ayaa u sugnaatey dhammaan dhalinyarada codsaday magangalyada ee akhriyay sheekadan ka hor inta aan la daabicin iyo kuwa ka caawiyey in si qurux badan loo dhammeeyo.

Waxay sidoo kale ka caawiyeen doorashada magacyada shaqsiyada waaweyn.


Mahad ayaa sidoo kale u sugnaatay mas'uuliyiinta Malta iyo Netherlands oo taageeray doodaha lala yeeshay dhallinyarada.



GALAB WANAAGSAN, MR. FRED!  
WAXAAN HALKAN U JOOGNAA  
INAAN KU WAYDIINO SU'AALO...



DABCAN,  
SOO GALI!




MAANTA WAXAAN RABNA INAAN BARANO  
SABABTA SAWIRADAYADA IYO FARAHAYAGA  
LOO QAATAY MARKII AAN NIMAANNAY?



SU'AAL FIICAN!

MARKA QOFKU YURUB  
YIMAADO ISAGA OO AAN HAYSAN  
BAASABOORKA AMA FIISAHA,  
SARAAKIISHU WAXAY WAYDIIN  
DOONAAN MAGACA, DA'DA IYO  
MEESHA ULU KA YIMID.




HADDII AAD KA WEYN  
TAHAY 6 SANO, SIDOO  
KALE WAXAY QAADI  
DOONAAN SAWIRKAAGA...




...IYO FARAHAAGA.

SAWIRRADA IYO FARAHA,  
OO SIDOO KALE LOO YAQAAN  
XOGTA FARAHA IYO INDHABA,  
WAXAA LA GELIYAA NIDAAM  
KOMBUYUUTAR OO AY  
KUJIRAAN DHAMMAAN  
MACLUUMAADKA DADKA  
SOO GALAYA YURUB.




TANI WAXAY KA CAAWISAA MAS'UULIYIINTA  
MAGANGELYADA EE DHAMMAAN WADDAMADA  
EU INAY HELAAN MACLUUMAADKAAGA.



MARKAA, SAWIRKAYGA  
IYO FARAHAYGA MA KA  
CAAWINAYAAN INAY  
I AQOONSADAAN  
MARKALE?




HAA!



MACLUUMAADKAN WUXUU KA CAAWIYAA MAS'UULIYINTA INAY LA SOCCAAN CIDDA SOO GAADHAYSA, GOORTA IYO MEESHA AY KA TIMID, SABABAHA SAFARKA, IYO HADDII QOFKU HOREY YURUB U JOOGAY.



SOO CAJIIB MA AHN IN ULSAN JIRIN QOF KALE OO ADDUUNKA OO DHAN FARAHIISU LA MID YIHIIN KUWAAGA?



HAA! FARUHU WAA WAX UGAAR AH QOF KASTA OO WAXAY SII JIRAAN XITAA MARKA AAN WAYNAANO...




MR. FRED, MARKA SAWIRKAYGA IYO FARAHAAGU KU JIRAAN NIDAAMKA KOMBUYULUTARKA, MA DOWLADDA DALKAYGA HOOYO AYAA MACLUUMAADKAN HELI KARTA?



MAYA, WAA LA QARIYAA MANA LALA WADAAGI DOONO DOWLADDA DALKAYGA HOOYO. HAD IYO JEEER LA SHAQEE SARAAKIISHA OO U OGOLOW INAY SAWIRKAAGA IYO FARAHAAGA QAATAAN. HADDII AAD DIIDDO, WAXAY KEENI KARTAA DIB U DHAC AMA WAXAY U MUIIQAN KARTAA INAAD MAR DAMBE RABIN INAAD CODSATO MAGANGELYO.

SAWIRKAAGA IYO FARAHAAGA SIDOO KALE WAXAY KA CAAWIN KARAAN IN LA HELO QOYSKAAGA HADDII AAD HALKAN CID KU LEEDAHAY. SIDOO KALE WAXAY KA CAAWIN KARTAA IN LA ARKO HADDII HORAY LAGUUGU DIIWAANGELIYEEY MAGANGELYO AMA SABABO AMNI DARTOOD.

QOF KASTA OO YIMAADA OO RABA INLUU CODSADO MAGANGELYO WAA INLUU SIDAAS KU SAMEEYAA DALKA UGU HORREEYA EE ULU YIMAADO. WAXAA MUHIIM AH IN LAGU SII JOOGO DALKA AAD KA DIIWAANGASHAN TAHAY.



QAAR KA MID AH CODSADAYAASHA WAXAY ISKU DAYAAN INAY HORAY U SOCDAAN IYADA OO AAN MAS'UULIYIINTU OGEYN.




ANIGUNA SIDOO KALE. WAXAAN RABAY INAAN HELO AWOOWGAY. INTII AAN SAFARKA KU JIRAY AYAAN KALA LUNAY. MAADAAMA AAN KA YARAHAY 18 SANO, WAXAAN LEEYAHAY MASUUL IGA TAAGEERAYA OO IGU TALIYAY INAAN JOOGO OO CAAWIMAAD HELO.


WAXAA JIRA HAY'ADO SI NABAD AH U HELI KARA AWOOWGAY ANIGOOON KELIGAY U DHAQAAQIN.

SIDOO KALE, HADDII AAN DHAQAAQO, WAXAAN HALIS U GELAYAA INAAN WAAYO QAAR KA MID AH ADEEGYADA IYO TAAGEERADA MEEL KALE OO WADDAN KALE AH.




XAQIIQATAN! MASUULKAAGU HAD IYO JEER WUXUU DOONAYAA WAXA KUU FIICAN ADIGA. IYADA OO LA KAASHANAYA MAS'UULIYIINTA, WAXAY ISKU DAYAAN INAY HUBIYAAN IN CARRUURTA KELIGOOD YIMAADA AY NABAD QABAAN.





HADDII AAD U DHAGAAGDO OO AAD COPSATO MAGANGELYO WADDAN KALE, KAAS OO AAN AHAYN DALKA AAD MARKII UGU HORREYSAY TIMID OO MAS'UUL KA AH, MAS'UULIYIINTA HALKAAS AYAA LAGA YAABAA INAY KU SOO CELIYAAN. WAXAAD KA QAADAN KARTAA RACFAAN GO'AANKAN.




WAA MAXAY RACFAAN ?



RAFCAAN KA QAADASHO MACNAHEEDU WAA INAADAN KU RAACSANEYN. LAAKIIN WAA INAAD SHARAXDAA SABABTA AADAN OGU RAACSANEYN. MASUULKAAGA IYO QAREENKAAGA AYAA KU SIIN KARA TALO.



MAXAY YIHIIN SABABAHA AAN LAGUGU CELIN KARIN?




HADDII AAD GOYS KU LEEDAHAY DALKA AAD U GUURTAY AMA AAD LEEDAHAY XAALAD CAAFIMAAD OO DARAN OO AY TAHAY INAAD SII WADATO DAAWEYNTA AAD BILOWDAY...

WAAN FAHAMSANAHAY...



GUUD AHAAN, WAA INAAD KU SII NAGAATAA HALKA AAD MARKII UGU HORREYSAY TIMID, KA COPSATAY MAGANGELYO, OO AAD ISKA DIIWAANGELISAY. TANI WAXAY IDINKAGA DHIGEYSAA MID FUDUD ADIGA IYO MAS'UULIYIINTA LABADABA.



...LAAKIIN SUGITAANKA MARARKA QAAAR WAA ADAG YAHAY... MARARKA QAAAR DADKA NAGU CAAWIYEY INAAN HALKAN IMAANO WAXAY NAGA RABAAN INAAN SI DHAKHSO AH U DHAQAAQNO.



UHM... DADKII SOO JEEDINTAAS SAMEEYAY WAXAA LAGA YAABAA INAYSAN U LAHAYN NIYAD WANAAGSAN.



HAD IYO JEER LA HADAL QOF HALKAN KA SHAQEEYA OO AAD KU KALSOON TAHAY KA HOR INTAADAN GAADHIN GO'AANNO WAAWEYN SIDA U DHAQAAQIDA WADDAN KALE.

INTA AAD SUGAYSO, MASHQUUL AHAANSHAHA AMA LA HADALKA GOYSKA IYO SAAXIIBADA MARKA AAD NIYAD-JABSAN TAHAY SIDO KALE WAXAY CAAWIN KARTAA.



SII WAD WAXBARASHADAADA...




... CIYAAR CIYAARAHA...




... KU RAAXAYSO!



ILMO MARNABA WAA IN UUSAN BOORSADIISA OO XIRXIRAN U DHAQAAQIN. SAFARKA KELIGIIS WUXUU NOGON KARAA MID KHATAR AH.





JAWAABAHAAGA WAXAA LAGU QORAA FOOMKA RAADINTA QOYSKA, KAAS OO MASUULKAAGA KAA CAAWIN KARO INAAD BUUXISO. HAY'ADDA KAA CAAWINAYSA RAADINTA QOYSKA AYAA KUU SHEEGI DOONTA HADDII AY HELAAN.

HADDII ADIGA, QOYSKAAGA IYO MASUULKAAGA AAD ISKU RAACDAAN, WAXAA LAYDINKU MIDEYN DOONAA TAAGEERADA MAS'UULIYIINTA. HADDII AADAN RABIN IN LAGUU MIDEEYO QOYSKAAGA, WAAD DIIDI KARTAA.





CANDHUUFTAADU WAXAY KA KOOBAN TAHAY MACLUUAMAAD BADAN. WAAD DOORAN KARTAA HADDII AAD RABTO INAAD QAADATO IMTIXAANKAN AMA AAD RABIN. LA HADAL MASUULKAAGA SI AAD TALO U HESHO.



OGSOONOW: HADDII MAS'UULIYIINTU SHAKI KA QABAAN XIRIIRKA GOYSKA AMA AYSAN HAYSAN MACLUUAMAAD KU FILAN, WAXAA LAGA YAABAA INAYSAN OGGOLAAN ISKU KEENISTA. DABCAN, WAXAAD KA QAADAN KARTAA RACFAAN GO'AANKAAS.



MR. FRED, INTA CAADIGA AH INTEE AYAY QAADATAA ISKU KEENISTA GOYSKA?




WAKHTIGU WUU KALA DUWANAAN KARAA. WAA INAAD SAMIRTA. MASUULKAAGU WUXUU KU SIIN DOONAA WARBIXINNO JOOGTO AH.

MASHQUUL AHAAW, BARO LUQADDA DEEGAANKA, WEYDII MASUULKAAGA HAWLAHA AAD KA QAYB QAADAN KARTO.



MARARKA QAAR WAXAAN KA WELWELAA IN DADKA AY I ARKAAN ANIGA OO DOQON AH MARKII AAN SU'AALHAAS OO DHAN WEYDIYO.






SU'AASHA 1

SHEEG XAALAD AY MAS'UULIYINTU RARI KARAAN AMA MEEL KALE U GUURIN KARAAN CODSADAYAASHA.



SU'AASHA 2

MARKA DADKA LA GUURIYO, MA DOORAN KARAAN DALKA?



SU'AASHA 3


MAXAA DHACA HADDII QOFKU UUSAN OGOLAYN GO'AANKA LAGU GUURINAYO?



MAYA, WAQTIYADA KAMA DAMBAYSTA AH WAA CIRIIRI. WEYDIISO LA-TALIYE SHARCI AMA MASULKAAGA TAAGEERO. TAAGEERADOODU WAA BILAASH.



SAX MAR KALE... IYO GUULEYSTUHU WAA... UHM... LABADIINABA!




MR. FRED, QOF AYAA XUSAY DANAHA UGU FIICAN EE ILMAHA. MAXAY DHAB AHAAN KA DHIGAN TAHAY?



MA ISKU DAYI KARAA INAAN SHARAXO?



DABCAN!




OH... SUG, HALKAN WAXAA JOOGTA MS. INES. WAXAY SI FIICAN U SHARIXI DOONTAA... MS. INES, MA NAGU SOO BIIRI KARTAA?



HAA. WAAN SHARXI DOONAA, KA DIBNA WAAD AKHRISAN KARTAA TAN...

WANAAGSAN.



# MUHIIM AH

## Gudaha wadankaan

Mas'uulka qaabilsan go'aaminta waddanka mas'uulka ka ah codsiga magangelyadaada waxaa loogu yeeraa: \_\_\_\_\_

Si aan ula kulmo oo aan ula hadlo masuulkaaga, waxaan la xiriiri karaa: \_\_\_\_\_

Waxaan la xiriiri karaa la-taliye sharci oo bilaash ah si aan wax badan uga barto habraaca magangelyada ama si aan taageero u helo haddii aan rabto inaan ka dacwodo go'aanka ay mas'uuliyiintu gaadheen.

Si aan talo uga helo habraaca magangelyada ama sida loo dacwodo, waxaan la xiriiri karaa: \_\_\_\_\_

Haddii qof halkan ka shaqeeya, sida saraakiisha, la-taliyayaasha sharciga, shaqaalaha bulshada ama masuulkayga si xun kuula dhaqmaan, waxaan cabasho ka samayn oo aan la xiriiri karaa: \_\_\_\_\_

Xaalad degdeg ah, waxaan la xiriiri karaa ambalaaska lambarka \_\_\_\_\_ ama lambarka booliska: \_\_\_\_\_

Mas'uulka qaabilsan hubinta inaan helno meel nabdoon oo aan ku seexdo, oo sidoo kale loogu yeero xarunta soo dhawaynta, waxaa loogu yeeraa: \_\_\_\_\_

Adeegyada lagu bixiyo meesha aan joogo waa bilaash. Haddii xubin ka tirsan shaqaalaha uu iga codsado lacag, waxaan cabasho samayn karaa anigoo la xiriiraya: \_\_\_\_\_

# MUHIIM AH

## Gudaha wadankaan

Hay'adaha iga caawin kara raadinta xubnaha qoyskeyga waxaa la yiraahdaa: \_\_\_\_\_

---

---

---

Hay'adda mas'uulka ka ah ka caawinta isku keenista qoyska, haddii tani ay danahaaga ugu fiican tahay, waa: \_\_\_\_\_

---

---

Akhbaarta kale ee muhiimka ah: \_\_\_\_\_

---

---

---

---

# KADIS

## Waxaan hubinayaa aqoontayda ku saabsan habraaca magangelyada!

☑ Sax jawaabta saxda ah

- 1 Maxay mas'uuliyiintu u qaadi doonaan sawirkayga iyo farahayga oo u gelin doonaan nidaam kombuyuutar?
- a. Si loo ogaado cidda aan ahay iyo goorta iyo meesha aan yimid.  
b. Si loo eego farahayga quruxda badan.
- 
- 2 Mas'uuliyiintu waxay hubiyaan haddii aan runtii xiriir la leeyahay qof si loo xaqiijiyo ka hor inta aan la isku keenin qoyskeyga, inaan nabad qabo.
- a. Run  
b. Been
- 
- 3 Iyadoo aan loo eegin waxa aan rabo, mas'uuliyiintu had iyo jeer way i soo diri doonaan qoyskeyga, haddii ay joogan Midowga Yurub (EU).
- a. Run  
b. Been (mas'uuliyiintu had iyo jeer way i dhageysan doonaan aniga iyo masuulkayga si loo helo xalka ugu fiican xaaladdayda hadda.)
- 
- 4 Waxaan u guuri karaa waddan kale anigoo aan wax dhibaato ah la kulmin mar kasta oo aan rabo.
- a. Run  
b. Been (waa wanaagsan tahay marka hore inaad la hadasho masuulkayga si aad wax uga barato cawaaqibka iyo khataraha suurtagalka ah ee ku lug leh.)
- 
- 5 Dalka ugu horreeya ee aan codsaday magangelyo oo aan ku diiwaangashanahay waa guud ahaan dalka mas'uulka ka ah codsiga magangelyadayda.
- a. Run  
b. Been

## Kadiska jawabhooda

Suasha 1: a; Suasha 2: a; Suasha 3: b; Suasha 4: b; Suasha 5: a.

# QORAALLO

# QORAALLO



## SOMALI

Buug-yarahan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuro xuquuq iyo wajjibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalka, waxaana keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, EUAA taas oo loogu talagalay dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas'uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas'uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas'uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025

